Su’aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

Sidee ayuu u shaqeeyaa hannaanka diiwaangelinta DPS ee SchoolChoice?

SchoolChoice waxaa loogu talagalay arday kasta oo raba ama u baahan inuu dhigto dugsi cusub sanadka soo socda, gaar ahaan ardayda "kala guurka galaya". Dhammaan ardayda ECE ee imanaysa waa inay buuxiyaan codsi. Haddii ardaygaagu uu hadda ku jiro fasalka barbaarinta ilaa fasalka 11aad oo uu sii joogi doono dugsigooda hadda sanad dugsiyeedka 2023-24, uma baahnid inaad buuxiso codsiga SchoolChoice*. Halkaan waxaa ku qoran sida uu SchoolChoice u shaqeeyo:

1. Marka hore, baaritaan ku sameey dugsiyada DPS adiga oo dib u eegaya Hagaha Diiwaangelinta Dugsiyada Wanaagsan, adigoo isticmaalaya School Finder, isla markaana la hadlaya dugsiyada aad xiisaynayso.
2. Mudnaanta sii dookhyada sare ee ardaygaaga oo ku soo kala hormari codsiga SchoolChoice. Waxaan kugula talineynaa inaad taxdo dookhyo badan, ilaa ugu badnaan 12 dugsi.
3. Onlayn ahaan u soo gudbi codsigaga SchoolChoice inta lagu jiro mudada Wareega 1aad. Mudada SchoolChoice ee sanad dugsiyeedka 2023-24 waxa ay bilaabanaysaa 10 a.m. Janaayo 13, 2023 waxayna dhamaanaysaa Febraayo 14, 2023 wakhtiga 4 p.m.
4. SchoolChoice waxay isku daraysaa dookhyada sare ee ardaygaaga iyo mudnaanta ogolaanshaha dugsi kasta iyo boosaska banaan. Dhammaan ardayda waxa si bakhtiyaa nasiib ah loogu qoondeeyaa lambarka bakhtiyaanasiibka kaas oo go'aamin doona dugsiga boos laga siin doono.

Ardayda waxaa boos laga siin doonaa dugsigo xulashadooda ugu sarreeya ee leh boos bannaan. Waxaa lagugu soo wargelin doonaa dhammaadka Maarso. U kala sareeysii dugsiyada hadba sida aad u kala doorbidayso.

**Ogsoonoow: Xaaladaha qaarkood, ardayga raba inuu sii joogo dugsigiisa hadda uu dhigto waxa la waydiin doonaa inuu soo gudbiyo codsiga SchoolChoice. Waxaana ku jiri kara ardayda dhigta dugsiyada ECE-8 ama 6-12. Qoysaska waxa ay ogeysiis ka heli doonaan DPS kahor Wareega 1aad haddi arintu sidan tahay.*

Ma haystaa fursad fiican oo aan ku galo dugsiga aan dookheyga sare ka dhigtay?

Ma jirto qaacido qarsoon! Waxaan kugula talineynaa in aad taxno dugsiyo badan, laakiin waxa ugu muhiimsan waa in loo kala sarreeysiiyo sida aad u kala doorbidayso. Haddii aadan helin dugsiga dookhaaga ugu sarreeya ah, nidaamka Xulashada wuxuu u guuri doonaa dookhaaga xiga ee ugu sarreeya. Waa fikrad sida caadiga ah khalad looga aaminsan yahay in dugsigu

daneeyo sida aad dookhyadaada ugu kala sarraysiinayso codsiga. Dugsiyadu ma arkaan lambarka ay kaga jiraan liiska dookhyadaada mana haystaan xulasho ah inay doortaan keliya ardayda dugsigaas u doortay dookhooda 1aad ahaan.
Meelaynta waxay ku salaysan tahay mudnaanta ardayga uu geliyey dugsigaas iyo lambarka bakhtiyaa nasiibka ee ardayga. Tusaale ahaan, waxaa suurtogal ah in ardayga dookhiisa 3-aad ee liiska dookhyada dugsiyada laga aqbalo dugsigaas kahor inta aan qof isla dugsigaas ka dhigay dookhiisa 1-aad la aqbalin, haddii ardayga koowaad uu ku jiro kooxda mudnaanta sare leh ee dugsigaas iyo/ama uu helay lambarka bakhtiyaanasiib ee sarreeya.

Ma haystaa fursad fiican oo aan ku galo dugsiga haddii aan soo gudbiyo codsigayga maalinta ugu horreysa ee SchoolChoice halkii aan ka soo gudbin lahaa maalinta u dambaysa?

Maya, codsiyada la soo gudbiyay inta lagu guda jiro mudada SchoolChoice ee Wareega 1 waxa loola dhaqmaa si isku mid ah. Ma jirto mudnaan la siiynayo codsiyada loo soo gudbiyay wakhtiga hore ee mudadaas.

Sidee ayuu hannaanka doorashadu isugu aadiyaa ardayda iyo dugsiyada?

Kadib Wareega 1aad, marka dhammaan codsiyada la soo gudbiyo, Algorithimka Xulashada ayaa si aan kala sooc lahayn dhammaan ardayda codsiyada soo gudbisatay u qoondeynaysa lambaro bakhtiyaanasiib ah oo u dhexeeya 1 iyo 1 milyan. Ardayda ayaa sidoo kale waxaa loo qoondeeynayaa heerka mudnaanta ee mid kasta oo ka mid ah dugsiyadii ay doorteen iyadoo lagu salaynayo qaybaha mudnaanta ee hore loo go'aamiyay ee dugsi walba uu soo daabacay.

Algorithimka ayaa markaas darajeyn doona isla markaana isku geyn doona ardayda ku jirta qayb kasta oo mudnaan leh iyadoo lagu saleynayo lambarkooda bakhtiyaa nasiibka ah ee loo qoondeeyay. Tani waxay soo saaraysaa liis qaabaysan (darajaysa oo la isku geeyey) oo ka kooban ardayda fasal kasta iyo dugsi kasta. Nidaamka ayaa wuxuu markaa u qoondeynayaa ardayda boosas iyadoo lagu salaynayo siday ugu kala horreeyaan liiskan; Nidaamka ayaa wuxuu markaa lambarada liiska sugitaanka u qoondeeynayaa dhammaan ardayda aan helin boos iyadoo loo kala hormarinayo sida ay u kala horreeyaan iyo sida loo kala saaray. Nadaamka waxa loo qaabeeyey qaab ah in la kordhiyo tirada ardayda helaysa dugsiga ay ka dhigteen dookha ay doorbidayaan.

Waa maxay aaladda Iskuul Raadinta (School Finder)?

Aaladda Iskuul Raadinta, oo laga heli karo halkan, waa aalad lagu raadiyo dugsiyada oo khadka tooska ah, oo loogu talagalay qoysaska DPS. Halkan, waxaad gelin kartaa sifooyinka dugsiga ee adiga muhiimka kuu ah, waxaadna ka heli doontaa liiska dugsiyo leh sifooyinkaas kuwaas oo loo soo kala horeysiiyo hadba sida ugu dhow ee ay u buuxinayaan shuruudaha aad rabto. Waxaad sidoo kale ku raadin kartaa cinwaanka, ama adiga oo si fudud u isticmaalaya liiska alifbeetada. Go'aaminta dugsiyada sida ugu fiican ugu habboon baahiyaha ardaygaaga ayaa ku

caawin doona marka la gaaro wakhtiga aad codsiga SchoolChoice ku kala hormarsiinaysid dugsiyada aad doorbidayso.

Waa maxay arday "kala-guur" ku jira?

Inta badan, ardayga kala guurka ku jira waa kan dhammaystay fasalka ugu sarreeya ee laga heli karo dugsigooda ama barnaamijkooda hadda ah. Tusaale ahaan, arday hadda dhigta fasalka shanaad kaas oo ku jira dugsi ECE-5 ah waxa loo tixgaliyaa inuu "u gudbayo" dugsiga dhexe, ama arday dhigta fasalka sideedaad ee hadda jooga dugsi 6-8 ah waxaa loo tixgeliyaa inuu "u gudbayo" dugsiga sare. Xaaladaha qaarkood, si kastaba ha ahaatee, ardayda fasalka shanaad ee dhigata dugsiyada ECE-8 iyo ardayda fasalka siddeedaad ee dhigta dugsi 6-12 ah ma gaarin fasalka ugu sarreeya ee laga heli karo dugsigaas laakiin weli waxaa loo tixgeliyaa inay yihiin kuwo "kala guur ku jira." Waalidiinta/dadka masuulka ka ah ardayda kala-guurka ku jira waxa DPS ku ogaysiin doonta kahor Wareega 1aad wixii talaabooyin ah oo ay u baahan yihiin inay qaadaan, haddi ay jiraan, si ay u doortaan dugsi sanad dugsiyeedka xiga.

Maxaa dhacaya haddii ardaygayga kala-guurka ku jira aanu soo gudbin codsiga SchoolChoice?

Ardayda kala-guurka ku jira ee ku nool xadka dugsiga ee aan soo gudbin codsiga SchoolChoice waxa laga diiwaangelin doonaa dugsiga xuduudkooda. Ardayda kala-guurka ku jira ee ku nool aagga diwaangelinta ama xuduudka la wadaago, kuwaas oo aan soo gudbin codsiga SchoolChoice, waa inay buuxiyaan codsiga Xulashada onlaynka ah ee Wareegga 2-aad. Haddii aad "dooratay" dugsiga ku yaala xuduudka ama aagga diiwaangelinta, dugsiga aad hadda ka diiwaangashan tahay ayaa ah dugsiga aad xaq u leedahay in aad dhigato. Haddii ardaygaagu dhammaystay fasalka ugu sarreeya ee laga heli karo dugsigiisa ama barnaamijkiisa, ama haddii ilmahaagu rabo inuu dhigto dugsi kale sanadka xiga, ardaygu waa inuu soo gudbiyaa codsiga SchoolChoice. Ardayda waxa lagu meelayn doonaa dugsi iyadoo lagu salaynayo helitaanka boos bannaan.

Ardeyda ku jirta fasalada aan "kala-guurka lahayn" sida fasalka labaad weli ma ka qayb qaadan karaan hannaanka SchoolChoice?

Haa. Ardayda danaynaysa inay doortaan dugsi kale oo aan ahayn dugsiga ay hadda ku jiraan waa inay soo gudbiyaan codsiga SchoolChoice.

Maxay yihiin taariikhaha muhiimka ah ee aan u baahanahay inaan xusuusnaado?

- Janaayo 13, 2023: Wareega 1-aad ee SchoolChoice waxa uu furmayaa 10 a.m.
- Febraayo 14, 2023: SchoolChoice ayaa xirmaya. Dhamaan codsiyada waxay ku eg yihiin 4 p.m.
- Dabayaaqada Maarso 2023: Qoysaska waxaa la ogeysiin doonaa dugsiyada lagu meeleeyey

- Horaanta Abriil 2023: Wareega 2-aad ee SchoolChoice ayaa furmaya

Goorma ayaa codsiga SchoolChoice la heli karaa?

Codsiga SchoolChoice waxaa khadka laga heli karaa 10 a.m., Janaayo 13, 2023. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan SchoolChoice, oo ay ku jiraan sida loo codsado, ayaa laga heli doonaa schoolchoice.dpsk12.org marka ay muddada codsashada soo dhawaato.

Halkee ayaan ka gudbinaa codsigayaga SchoolChoice?

Sanadkani wuxuu noqon doonaa sannadkii shanaad ee codsiga SchoolChoice ee onlaynka ah ee moobilkana laga codsan karo ee DPS. Codsiga waxa la heli doonaa halkan. Marka uu furmo daaqada/muddada Xulashada, qoysasku waxay ku soo gali karaan iyagoo isticmaalaya faahfaahinta akoonkooda Barta Waalidiinta ama waxay samaysan karaan akoon cusub, buuxinayaan codsigooda isla markaana ku soo gudbinayaan wakhti kasta inta lagu jiro daaqada/muddada Xulashada.

Dugsiyadee ayaa lagu daray hannaanka diiwaangelinta SchoolChoice?

Ku dhowaad dhammaan dugsiyada degmada ayaa ka qaybqaata hannaanka SchoolChoice, oo ay ku jiraan dugsiyada xaafadda, dugsiyada leh barnaamijyada gaarka ah, dugsiyada hal-abuurka iyo dugsiyada jaatarka. Dugsiyada waddooyinka kala duwan (Pathways) sida caadiga ah kama qaybqaataan. Fadlan si toos ah ula xiriir dugsiyadaas si aad uga hesho macluumaadka diiwaangelinta.

Waa maxay aagga diiwaangelinta?

DPS gudaheeda, aagga diwaangelintu waa aag juqraafiyeed halkaas oo ardayda ku dhex nool loogu dammaanad qaaday booska mid ka mid ah dhowr dugsi, ma aha oo kaliya hal dugsi oo gaar ah. Waxaa jira faa'iidooyin badan oo ku aadan aagga la wadaago, oo ay ku jiraan: fursad sii kordhaysa oo gelitaanka dugsiyada waxbarashadoodu sareeyso ah; fursad sii kordhaysa oo helitaanka xulashooyinka gaadiidka ah; mudnaan ayaa lagu siinayaa marka loo eego ardayda aan ku noolayn aaggaas; iyo gelitaanka noocyada kala duwan ee barnaamijyada dugsiga. Eeg macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan aagagga diiwaangelinta.

Ma jiraan wax tallaabooyin isdiiwaangelineed oo dheeraad ah oo la xiriira dugsiyada qaarkood ah?

Dhawr dugsi oo leh barnaamijyo gaar ah ayaa leh tillaabooyin isdiiwaangelineed oo dheeraad ah si loogu qalmo gelitaanka dugsiga kuwaas oo ka baxsan buuxinta foomka SchoolChoice. Tusaale ahaan, Denver School of the Arts (Dugsiga Farshaxanka ee Denver) wuxuu u baahan yahay dhageysi/bandhig taas oo qayb ka mid ah codsiga ardayga. Dugsiyadan waxa lagu tilmaamay Hagaha Diiwaangelinta Dugsiyada Wanaagsan iyo codsiga SchoolChoice.

Dhammaan dugsiyada ma yeelan doonaan waqti isku mid ah?

Haa. Dhammaan dugsiyadu waxay leeyihiin isku wakhti kama dambays ah oo la soo gudbinayo codsiyada SchoolChoice oo ah ugu dambayn 4 p.m., Febraayo 14, 2023. Qoysaska waxaa la ogeysiin doonaa dugsiga lagu meeleeyey ardaygooda marka la gaaro dabayaaqada Maarso 2023. Qaar ka mid ah barnaamijyada gaarka ah, sida diirad saaridda farshaxanka, barashada labada luqadood ama barnaamijka hibada iyo kartida sare, waxay leeyihiin tillaabooyin isdiiwaangelineed oo dheeraad ah waxayna raacaan waqtiyo gooni ah si loo dhamaystiro tillaabooyinkan. Haddii aad ka fekereyso dugsi ama barnaamij gaar ah, fadlan kala xiriir dugsiga si aad u hesho wixii tafaasiil ah ee ku saabsan tillaabooyinka diiwaangelinta ee dheeraadka ah.

Sidee ayuu u shaqeeyaa nidaamka iswaafajinta SchoolChoice, sideese ilmahayga loogu diiwaangelin doonaa dugsi?

Ardayda waxaa loo tixgalin doonaa in laga diiwaangeliyo dugsi kasta iyadoo lagu salaynayo xulashooyinkooda ay ku taxeen codsiga SchoolChoice iyo mudnaanta ogolaanshaha (walaalaha ama dadka degan Denver, tusaale ahaan) kuwaas oo uu dejiyay dugsi kasta. Mudnaanta ogolaanshaha ee dugsi kasta ayaa laga heli karaa halkan. Koox kasta oo mudnaan leh gudaheeda, lambar bakhtiyaa nasiib ah ayaa arday kasta loo samayn doonaa si loogu kala saaro wixii "bareejo" ah oo ka dhex dhasha kooxda mudnaanta leh gudaheeda. Nidaamka SchoolChoice wuxuu tixgalin doonaa dookhyada ardayda, mudnaanta dugsiyada iyo boosaska ka bannaan dugsiyada si loo go'aamiyo siday ardaydu isugu xigaan diiwaangelinta.

Haddii aan hal dugsi ku taxno codsiga SchoolChoice, ma heli doonaa fursad sareeysa oo ah inaan diiwaangelin ka helno dugsigaas?

Maya. Tirada dugsiyada ee lagu qoro foomka SchoolChoice saameyn kuma yeelan doonto suurtagalnimada ah in lagaa diiwaangeliyo dugsi gaar ah. DPS waxay si adag ugu talinaysaa in arday kastaa u liis gareeyo dugsiyada dookhooda ah ee ugu sarreeya hadba sida ay u kala horreeyaan, ilaa ugu badnaan 12 dugsi.

Ka waran haddii ardaygaygu aan lagu meelayn dugsiga xulashada koowaad u ah?

Haddii ardaygaaga aan laga diiwaangelin dugsigii ay door-bidayeen, waxa la gelinayaa liiska sugitaanka ee dugsigaas. Goorta iyo haddii uu dugsigu boos ka soo bannaanaado, waa lagula soo xiriiri doonaa waxaana lagu siin doonaa diiwaangelin. Si aad u aragto boosaska liiska sugitaanka, gal akoonkaaga SchoolChoice.

Sidee ayay liisaska sugitaanka u shaqeeyaan?

Waxaa muhiim ah in la ogaado in liisaska sugitaanka ay firfircoon yihiin, taasoo la macno ah in boosaskaaga liiska sugitaanku kor u kici karaan ama hoos u bixi karaan iyadoo lagu saleynayo ficillada iyo mudnaanta dhammaan codsadayaasha kale, wareegga 1-aad iyo wareegga 2-aad

labadaba. Tusaale ahaan, booska liiska sugitaanka ee ardaygaaga ee dugsiga waxa laga yaabaa inuu iska beddelo lambarka 6 uuna tago ilaa lambarka 7, sababtuna ay tahay ah arday ku jira koox mudnaan sare leh oo boos ka codsanaya dugsigaas.

Halkaan waxaa ku yaala tusaalooyin gaar ah oo ku saabsan sida arrintaasi ay u dhici karto:

- Haddii aad ku jirto liiska sugitaanka ee dugsi aan ahayn dugsigaaga xuduudka ama dugsi ku yaal aagga diiwaangelinta, arday cusub oo ku nool xuduuddaas ama aagga diiwaangelinta ayaa yeelan doona mudnaan sareysa.
- Haddii arday laga diiwaangeliyo dugsi iyadoo la isticmaalayo liiska sugitaanka, ardayga walaalkiisa ee ku haray liiska sugitaanka ayaa ka sare maraya ardayda isaga oo aan mudnaantaas lahayn.
- Haddii codsadaha dugsiga uu yahay ilmo uu dhalay shaqaale waqti-buuxa ka shaqeeya dugsigaas, codsaduhu ayaa ka sare maraya ardayda isaga oo aan mudnaantaas lahayn.
- Ardeyga ku nool xadka DPS wuxuu leeyahay mudnaan sare wuxuuna ka sare mari doonaa qof aan deganayn Denver oo ku jira liiska sugitaanka.

Wax badan ka baro mudnaanta gelitaanka dugsiga.

Liisaska sugitaanka ee SchoolChoice ee dugsiga xannaanada carruurta ilaa fasalka 12aad waxay sii jirayaan ilaa dhammaadka Sebtembar 2023. Liisaska sugitaanka ee ECE3 iyo ECE4 waxay socon doonaan ilaa Abriil 2024 sannad dugsiyeedka 2023-24.

Haddii boos lagaa siiyo liiska sugitaanka ee dugsi aad dookhaaga sare ka dhigatay oo aad aqbasho, dugsi kasta oo xulashadaas ka hooseeya waa lagaa saari doonaa.

Ilmahaygu weli boos ma looga dammaanad qaaday dugsiga xuduudkayaga?

Haa. Hannaanka SchoolChoice ma beddelo siyaasadaha degmada oo ay ku jirto booska fasaleed ee la dammaanad qaaday ee fasalada xanaanada carruurta ilaa fasalka 12aad ee dugsigaaga xuduudka. Haddii ardaygaaga laga aqbalo Hannaanka Xulashada ee dugsi aan ahayn dugsiga xadkaaga, markasa dugsigaasi wuxuu noqonayaa "dugsiga xaafadaada" booska aad ku lahayd dugsiga xuduudka lama dammaanad qaadi doono.

Kadib markii aan iska diiwaan geliyo dugsi aan ahayn dugsigeyga xuduudka annigoo u maraya SchoolChoice, miyaan awoodaa in aan ku laabto dugsigayga xuduudka?

Si aad ugu soo laabato dugsiga xadka, waxa aad soo gudbin kartaa codsiga SchoolChoice wareega 2-aad kadib ogaysiisyada Wareega 1aad ee dabayaaqada Maarso. Dhammaan codsiyada Wareega 2-aad waxa la geliyaa liiska sugitaanka marka hore. Haddii boosas

bannaan oo dheeraad ah la heli karo, dugsigu wuxuu soo bandhigi doonaa boosaskaas hadba siday ugu kala horreeyaan liiska sugitaanka.

Ardaygeygu wuxuu ku jiraa liiska sugitaanka dugsiga. Goormaan maqli doonaa haddii isaga/iyada la siiyey boos/kursi?

Liisaska sugitaanka ayaa shaqaynaya ilaa dhammaadka Sebtembar. Dugsiyadu waxay boosas siin doonaan ardayda ki jirta liiska sugitaanka marka ay ogaadaan inuu boos ka bannaan yahay, taasoo noqon karta kadib marka sannad dugsiyeedku bilowdo.

Haddii mid ka mid ah carruurtayda uu 'doorto' dugsi aan ahayn dugsi xuduudeed oo dammaanad leh inuu boos ka helayo, carruurtayda kale ma awoodi doonaan inay 'doortaan' isla dugsigaas?

Mudnaanta sare waxaa la siiyaa walaalaha la dhashay ardayda hadda dugsiga ku jirta iyo kuwa soo laabanaya inta lagu jiro wareegga 1-aad, iyo inta badan walaalaha isla dhashay waxaa loo oggolaadaa dugsi isku mid ah oo ay wada doorteen. Si kastaba ha ahaatee, diiwaangelinta walaalaha ee dugsiga xulashadooda ah mar walba lama dammaanad qaadi karo sababo la xiriira boosaska bannaan oo xaddidan.

Goorma ayaan u baahanahay inaan kala doorto dalabyada dugsiyeed ee kala duwan?

Marka codsiga SchoolChoice ee Wareega 1aad la soo gudbiyo, waxaad codsanaysaa dugsi cusub sannad dugsiyeedka soo socda. Waxaad u baahan doontaa inaad xaqiijiso inaad si habboon u kala hormarisay dugsiyadaaga, kahor inta aanad soo gudbin codsigaga SchoolChoice. Bisha Maarso, ardaygaaga waxa boos laga siin doonaa hal dugsi oo keliya kaas oo “sida ugu fican” ugu habboon sifooyinkooda isla markaana ah dugsi DPS ah.

Ka warran haddii aanan ku faraxsanayn dugsiga booska laga siiyey ardaygayga ama haddii aan beddelo maskaxdayda/go’aankayga?

Wareega 2-aad ee SchoolChoice waxa uu bilaabmayaa marka la soo diro ogaysiisyada Wareega 1aad horraanta Abriil 2023 waxana uu soconayaa ilaa Agoosto 31, 2023. Codsiga Wareega 2-aad ee SchoolChoice waa in lala soo gudbiyaa dugsiga la codsaday. Ardayda waxaa lagu meelayn doonaa dugsiga ay rabaan hadba sida ay ugu soo kala horeeyaan, iyadoo ku xiran boosaska bannaan ee la heli karo. Dugsiyada ardayda lagu meeleeyey wareega 2-aad ayaa bedeli doona dugsiyadii lagu meeleeyey wareegii 1-aad. Qoysaska waxa la waydiin doonaa in ay darajeeyaan/kala sareysiiyaan dhammaan dugsiyadii uu ardaygu ku codsaday labada wareeg ee 1-aad iyo 2-aad, dugsi kasta oo ka hooseeya dugsiga ardayga laga aqbalay waa la kansal garayn doonaa.

Ilmahaygu ma heli doonaa gaadiid uu ku aado dugsigii laga diiwaangeliyey?

Gaadiidka lama dammaanad qaadayo. Fadlan booqo websaydka gaadiidka si aad u hesho wixii faahfaahin ah.

Waa maxay dukumeentiyada aan u baahanahay si aan u codsado dugsi?

Qoysasku waxay u baahan doonaan inay soo gudbiyaan dukumeentiyada soo socda:

- **Xaqiijinta da'da ilmaha**. Dukumeentiyada la aqbali karo waxaa ka mid ah nuqulka shahaadada dhalashada, diiwaanka baabtiiska ama diiwaanka isbitaalka.
- **Xaqiijinta cinwaanka hadda ah**. Dukumeentiyada la aqbali karo waxaa ka mid ah nuqulka heshiiska kirada hadda ah, caddaynta lahaanshaha guriga, ama biilka tamarta sida gaaska, korontada, biyaha ama fiilada interneetka.
- **Xaqiijinta dakhliga hal bil ah (looga baahan yahay ECE-4 kaliya)**. Dukumeentiyada la aqbali karo waxaa ka mid ah inta badan warqaddaha lacag bixinta ee hadda ah (haddii mushahaarka la bixiyo wax ka badan hal mar bishii, ku soo dar dhammaan warqadaha lacag bixinta ee bisha oo dhan), caddaynta mushaharka ama canshuur celinta.
- Ardayda dugsiga sare, sidoo kale waa inay keenaan qoraallada iskiribtiga ee dugsigii hore ee fasallada 9-12.

Yaan la xiriiraa haddii aan qabo su'aalo dheeraad ah?

Adeegyada diiwaangelinta waxa lagala xiriiri karaa 720-423-3493 ama schoolchoice@dpsk12.org.